

# Dawladdu oo go'aamisay in degmooyinka tallaalka loo kala badiyo

Dawladdu waxay go'aamisay in degmooyinka tallaalka aad loogu kala badiyo. 24 degmo oo cudurku muddo dheer ku badnaa ayaa tallaalka 60 % loo kordhinayaa ilaa iyo inta tallaalka loo fidinayo dhammaan dadka 18 sano ka weyn.

- Sababta ugu muhiimsan ee ay dawladdu degmooyinka tallaalka ugu kala badinayso ayaa ah in ay taasi sare u qaadayso fursadda aan si wadajir ah bulshada goor hore dib ugu furi karno. Cid kasta ayay dan ugu jirtaa, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Toddobaadki hore ayay dawladdu go'aamisay in degmooyinka tallaalka loo kala badiyo, laakiin waxaa lagu xiray in degmooyinka tallaalka laga yareynayo bisha juun iyo billowga luuliyo ay awoodaan in ay tallaalka dhaafay dadka siiyaan qaybta danbe ee luuliyo.

Agaasinka caafimaadka ayaa loo xilsaaray in ay arrintaas degmooyinka isla eegaan. Wasiirka caafimaadka iyo daryeelka ayaa 19-kii maajo la shiray guddoomiyayaasha gobollada, shirkaas kaddib ayaana la gaaray go'aanki kama danbaysta ahaa ee degmooyinka tallaalka loogu kala badinayay. Degmooyinka intooda badan waxay sheegeen in ay kordhin karaan dadka ay tallaalayaan fasaxa kulaylaha, inkasta oo ay adkaan doonto.

- Qaar badan oo guddoomiyayaasha gobollada ka mid ah ayaa maanta igu yiri: "Way adag tahay, laakiin haddii laga maarmi waayey, waan qabanaynaa." Waan la dhacay oo waa u mahadcelinayaa in degmooyinka ay hawsha adag sugeyso bisha luuliyo ay taageero sidaa u weyn u muujinayaan kuwii uu cudurka safmarka ah dhibka ugu badan u geystay, ayuu yiri Høie.

Tallaallada badan ee mustaqbalka na soo gaari doona ayaa keeni doona in tallaalistu badnaan doonto degmo walba.

- Meelna tallaalistu ka istaagi mayso, laakiin degmooyinka mudnaanta la siiyay ayaa degdeg dadka loo tallaali doonaa, ayuu yiri Høie.

### **Liis cusub ayaa qaybinta lagu saleeyay**

FHI ayaa dawladda kula talisay degmooyinka ay tahay in tallaalka loo kordhiyo bisha juun, kuwa ay tahay in aan tallaalkooda waxba laga beddelin, iyo kuwa ay tahay in laga yareeyo. Qiimayn cusub oo waafaqsan is-beddeladii u danbeeyay ayay dawladdu codsatay, 14-kii maajo ayay na FHI dawladda soo gaarsiisay liiska cusub ee degmooyinka. Liiskaas cusub ee FHI ayay dawladdu ku salaysay qaybinta tallaalka.

Waxaa la filayaa in ay qaybinta tallaalka la kala badsanayo billaaban karto toddobaadka 23-aad. 24-ka degmo ee mudnaanta la siiyay waxay tallaalka koowaad ka helayaan qiyaasti boqolkiiba 60 in ka badan intii ay marki hore heli lahaayeen, waxayna helayaan ilaa iyo inta dhammaan dadka 18 ka weyn tallaalka loo fidinayo. Oslo, Sarpsborg, Fredrikstad iyo Lørenskog oo dhammaan mudnaan la siiyay, waxaa loo kordhinayaa ilaa iyo boqolkiiba 40.

Go'aankan ayaa wuxuu keenayaa in 309 degmo ay muddo ilaa 7 toddobaad ah heli doonaan tallaalka koowaad oo celcelis ahaan boqolkiiba 35 ka yar inti ay heli lahaayeen marka la eego tirada dadweynaha halkaas ku nool.

- Hannaanka barnaamijka tallaalku waa in uu noqdaa mid ay degmooyinku isku hallayn karaan, oo la helaa xalal lagu caawiyo degmooyinka dhibka ugu badan soo sheega gabagabada barnaamijka, ayuu yiri Høie.

Taas darteed waxay dawladdu:

- u xilsaaraysaa FHI in ay hubiso in tallaalistu xagaaga u dhacdo hab ay degmooyinku isugu hallayn karaan sida ugu badan ee suurtaggalka ah.
- u xilsaaraysaa Agaasinka caafimaadka, FHI iyo guddoomiyayaasha gobollada in ay la socdaan degmooyinka soo sheega in ay ku adkaatay sidii ay u maarayn lahaayeen tallaalka daahay, una soo jeediyaan sida ay u caawin karaan.

- u xilsaaraysaa guddoomiyaha gobolka ee Oslo iyo Viken (halkaas oo ay ku yaallaan dhammaan 24-ka degmo ee mudnaanta la siiyay) in uu wadahalal la galo 24-ka degmo, si loo eego in ay caawin karaan degmooyinka ay ku adkaato in ay dadkooda tallaallaan bilaha luuliyo/ogosto, ayaga oo tusaale ahaan ku caawinaya in ay u diraan shaqaale caafimaad.

**Degmooyinka tallaalka loo kordhin doono:**

Asker

Bærum

Drammen

Eidsvoll

Enebakk

Fredrikstad

Halden

Indre Østfold

Lier

Lillestrøm

Lørenskog

Nannestad

Nesodden

Nittedal

Nordre Follo

Oslo

Rakkestad

Rælingen

Råde

Sarpsborg

Skien

Ullensaker

Vestby

Ås

**Degmooyinka heli doona tallaalka ku jaango'an tirada dadkooda (degmooyinka dhexdhexaadka ah):**

Aurskog-Høland

Bamble

Bergen

Frogn

Færder

Gjerdrum

Holmestrand

Horten

Hurdal

Kongsberg

Kristiansand

Lunner

Marker

Moss

Nes

Porsgrunn

Ringerike

Sandefjord

Skiptvet

Stavanger

Trondheim

Tønsberg

Øvre Eiker